

Su`aalaha Inta badan la Isweydiyo ee ku Saabsan Qoraalka Talaalka COVID-19

Waqtigen hadda la joogo, waxay u badan tahay inaad maqlashid xog badan oo ku saabsan talaallada COVID-19. Waxaan doonaynaa inaan ka jawaabno qaar ka mid ah su'aalaha guud ee ku saabsan talaalka COVID-19 ee hadda la sameeyay.

Sidee ayaa talaallada COVID-19 loogu sameeyay si degdeg ah?

Sida caadiga ah, inta aan talaalka cusub dad badan la siin, waxa tijaabo lagu xaqiijiyaa in talaalka cusubi uu mid aan waxyeelo lahayn isla markaana shaqaynaya. Aafadan socota darted iyo kaashiga lacag ka timid federaalka ayaa dadajisay in ay saynisyahadu labadaa tijaababa isku mar sameeyaan. Hadda talaallada la tijaabiyay ee loo arko in aanay waxyeelo lahayn oo kaliya ayaa la adeegsan doonaa.

Sidee ayaa loo tijaabinayaa talaallada?

Waxaa jira talaallo kala duwan oo COVID-19 ah oo tijaabo ku socoto. Tijaabooyinkaan waxaa loo yaqaanaa tijaabooyinka caafimaadka. Talaal kasta wuxuu marayaa wax ka badan hal baaritaan. Marka koowaad, talaalka ayaa lagu tijaabiyaa dad kooban oo mutadawiciin ah, kadibna dhawr boqol, kadibna tobanaan kun. Dadka mutadawiciinta ah ee tijaabooyinka talaalka COVID-19 qaatay ayaa ka yimid bulshooyin badan oo kala duwan iyo qoysas kala duwan. Kani waa isla nidaamka loo adeegsado tijaabinta talaallada kale.

Sidee ayaa loo ansixin doonaa talaallada?

Marka Talaalladu ka gudbaan dhammaan tijaabooyinka, koox khubaro caafimaad ah ayaa eegi doonta natiijooyinka baaritaanka iyo sida dadku dareemeen kadib marka talaalka lagu duray. Haddii talaalku shaqeeyo oo aanu waxyeelo lahayn, waa la ansixiyaa. Waxaa jira kooxo badan oo saynisyahano iyo khubaro ah oo dib u eegis ku wada xogta badqabka talaallada COVID-19 bixinaya talooyin. Kaliya talaallada la ansixiyay ayaa la siin doonaa dadka.

Qofkee ayaa heli doona talaalka marka koowaad

Guddi Talo-bixiyeyaal qaran ah oo ka socda CDC oo ah (Xarunta Xakamaynta iyo ka Hortaga Xanuunada) ayaa eegaysa xogta oo waxay talooyin ka bixinaysaa cidda helaysa talaalka marka koowaad. Kooxaha qaar oo khatarta ugu wayn ugu jira COVID-19 ama aad ugu xanuunsan kara COVID-19 ayaa talaalka koowaad helaaya. Minnesota waxay diyaarsatay koox khubaro ah oo gacan ka gaysan doonta xaqiijinta in talaalka loo helo si siman, ayadoo diirada la saaraayo sinaanta caafimaadka.

Marka talaalo dheeraad ahi yimaadaan, dad dheeraad ah ayaa awooddi doona in la talaalo, laakiin waxay qaadanaysaa dhawr bilood kahor intaan talaal qof kasta ku filan la helin.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan talaalka COVID-19 booqo websetka waaxda caafimaadka.

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

11/09/20 (Somali)

To obtain this information in a different format, call: 651-201-4989.